

Luuqada Dhagoolaha ee ilmaha

Sidee ayay u caawin kartaa luuqada dhagooluhu ilmaha wax maqla?

La xiriirka ilmahaagu wuxuu bilowdaa ka hor inta uusan ilmuhu oran kalmadda u horaysa. Idinka oo isfiirinaya, samaynaya fal muujinaya dareen, oraahna weheliso, iyo tilmaamidu waa qaababka ilmuhu kuugu sheegi karaan waxa ay rabaan ama ay u baahanyihiin. Marka aad tustid fal ama ficil aad kula hadlaysid, ilmuhu badanaa way kuu muujin karaan waxa uu rabo ama u baahanyahay ka hor inta uusan baran in uu hadlo. Markaa kadib, waxa uu bilaabayaa in uu wax yiraahdo, kadibna waxaa bilaabanaya in ay yaraato isticmaalka luuqada dhagoolaha.

Ilmuhu waxay uu baahanyihiin qaab ay wax kula xiriiraan si ay u maamushaan xaalada ay ku suganyihiin una yaraato caalwaagoodu. Waxay kaloo u baahanyihiin in ay wax kala doortaan awoodna u yeeshaan in ay madax banaanaadaan. Ilmaha aan hadalka bilaabin la filayayna in ay hadlaan waxay bilaabaan in ay caalwaa noqdaan hadal la'aanta awgeed ka hor inta aysan baran hadalka. Luuqada dhagooluhu waxay siinaysaa ilmaha fursad uu wax ku kala doorto, madax banaanina uu dareemo.

Ma suurtoowdaa luuqada dhagooluhu in ay baqdin ka galiso barashada hadalka?

Maya. Luuqada dhagooluhu waxay lammaane u tahay luuqada lagu hadlo. Barashada luuqada dhagoolaha waxay ka caawintaa ilmaha in uu xiriir la sameeyo u dhaxeeya isaga shayga iyo sumadiisa. Calaamaduhu waxay baraan ilmaha luuqad xoog badan; markay bartaan dhowr calaamadood, ilmo badan ayaa ku dhiirada in ay isticmaalaan sidoo kale kalmado.

Sidee u caawin karaa ilmahaayga?

Halkaan waxaad ka heli kartaa tilmaamo dabiici ah oo kaa caawinaya sidii aad ula xiriiri lahayd ilmahaaga:


- Gacan haadin (“Nabah,” “Nabadaay”)
- Gacmo kor uqaad (“I qaad?”)
- Madax ruxid (“Haa,” “Maya”)
- gacmaha oo aad wax ku riixdo (“Ma rabo.”)
- sacab tumid (“Aan ciyaarno,” “Yay!”)
- shumo ama shumo u dir (“Waan ku jeclhay.”)
- farta oo aad ku fiiqdid boonbalaha markii lagu siiyay ikhtiyaar aad ku dooratid
- wajiga oo aad ka muushisid shucuurta (sida farxada, xanaaqa, murugada)
- habraaca ciyaaraha iyo ciyaaraha faraha (“Itsy bitsy spider,” “Peek-a-boo,” “Pat-a-cake”)

Calaamado sahal ah oo badan oo masawiro ah ayaa ku yaala boga labaad. Dooro dhowr calaamadood oo aad ku bilowdid, oo aad u malaynaysid in ay muhiim u yihiin ilmahaaga. Tusaale, haddii ilmahaagu jecelyahay banooniga, ka bilow tilmaamaha “banooni.” Caadiyan, tilmaamaha “iigu celi” iyo “waa dhamaatay” weeye kuwa u horeeya oo la baro. Marka aad baraysid tilmaan kasta, kor u dheh iyada oo eray ah.

Ha ka filan ilmuhu in uu markiiba isticmaalo tilmaamaha. Dadka qoyska ka mid ah ayaa ka caawin kara barashada tilmaamaha haddii ay ugu celceliyaan. Tusaale, hadda, way sahlantahay in aad isticmaashid tilmaanta “cun,” “iigu celi,” iyo “waa dhamaatay.” Sidoo kale waxaad ku caawin kartaa in aad gacmihiisa ku tustid in uu sameeyo tilmaamaha.




waa dhamaatay




cun




cab




iigu celi



musqul




xafaavad
bedel




qubays



hurdo




caawin




hooyo




aabe



dhakhtar ama
kalkaaliso




soco



jooji



sug




fadlan




mahadsanid



lihi/anaa leh




fur




xir




xanuun ama
waxyeeelo




ciyaar



rabid




ilmo



banooni



buufisyo



baabuur